

Talo laxiriirta taageeridda carruurtaada kadib dhacdada naxdinta leh

Sida carruurta uga falceliyeen naxdinta way ka duwantahay dadka weyn

Sida carruurta uga falceliyeen naxdinta way ka duwantahay dadka weyn – waxaa laga yaabaa inay ka laabtaan ama u dhaqmaan qaab aad “dhalaannimo”, u muuqdo walwalsan ama qalafsan, iskugu mashquuliyaha dhacdada ciyaartooda ama sawirida, dhibaatooyin ku qabo hurdada ama qarowga, ama malaha waxaa la heli karaa aastaamaha jirka sida calool xanuunka ama madax xanuunka.

Sida ay quseyso dadka weyn, inta badan carruurta waxay uga soo kabsanayaan taageero iyo jaceylka kuwa iyaga udhow.

Haddii aad tihiin waaladiinta ama daryeelayaasha waxaad u ogaaneysaa carruurtaada sida wanaagsan, iyo waxa iyaga u shaqeeyo. Qaar ka mid ah *waxyaabaha la sameeyo* iyo *waxyaabaha aan la sameyn* ee hago canug murugeysan waa:

Samey:

1. **Kalsooni geli** in dhacdada ay dhammaatay oo ay badbaado yihiin.
2. **Ku dhiirageli** iyaga inay ka hadlaan sida ay ka dareemaan waxa dhacay.
3. **U sheeg iyaga inay weydiin karaan su'aalo**, oo kaga jawaab kuwaan luuqad cad oo ku haboon da'dooda – daacad ka ahow laakin ka fogow sharaxaadaha naxdinta.
4. **U sheeg in dareemida murugada ama cabsida ay caadi tahay**, iyo in kuu sheegaan sida ay dareemayaan oo caawin doonto, iyo in waqtiga ay wanaagsa dareemayaan.
5. **Faham leh** – waxay dhibaato ku qabi karaan hurdada, xanaaqqa, sarriir ku kaadinta – u dulqaado oo kalsooni sii haddii tani ay dhacdo – mar kale, oo ay la jirto taageerada iyo daryeelka ay gudbineyso.
6. **Sii carruurtaada jaceyl dheeraad ah iyo taxadar.**
7. **Xasuso in carruurta fiiriyaan waaladiintooda oo labadaba badbaado dareenka iyo ogaanshaha sida looga jawaabo** – kalsooni sii iyaga, la wadaag inaad murugeysantahay sidoo kale laakin aad ogtahay inaad wada fiicnaaneysaan.
8. **Isku day inaad joogteysid jadwalo caadi ah** – waqtiyada cuntada, waqtiyada jiifka iwm – u ogolow iyaga inay banaanka aadaan oo ciyaaraan, aadista darjiinka iwm.
9. **SI KASTABA haddii dhibaataada canug ay ka sii dareyso, ama ay muujinayaan wax dabeecadaha walaaca** – ka laabashada daran, argagaxa aysan ku kalsoonaan karin iwm – caawin raadi xili hore. **Dhaqtarkaaga guud (GP) waad ka bilaaban kartaa, AMA taageerada cabashada, walaaca, dhibaataada ama fayo qabka maskaxda, waxaad soo wici kartaa ama fariin qoraal u soo diri karta 1737 – bilaash ah, waqti walba, 24 saac maalintii, 7 maalmood isbuucii - si aad ugala hadashid la taliyaha tababaran.**

Ha sameynin:

1. **Ka hadlidda sharaxaadaha dhacdada naxdinta** oo ku celin ah waa waxyeelo. Carruurta way la yaabaan/cabsadaan oo waxay rabi karaan sharaxaadaha, kala hadal waxay ay arkeen/ay la kulmeen.

2. **Haddii tani lagu celiyo isku day inaad diiradda saartid iyaga sida ay dareemayaan** tusaale ahaan, waxa dhacay aad ayay u xuntahay, waa caadi in murugo ama cabsi la dareemo, sidee ayaad dareemeysaa?.
3. **Haa u sheegin “haa walaacin” ama “ha murgin”** – waa caadi in la raboodo ka illaalintooda cabsida iyo dareemaha adag, laakin waxay u baahanyahiin in la ogaado dareemahooda oo loo ansixiyo sida jawaab caadi ah.
4. **Haa isku dayin inaad si xad dhaaf ah u illaalisid**, markale tani waa waxyaabo dabiici ah oo waaladiinta ay sameeyaan, laakin sida ka qeyb ah joogteynta jadwalada caadiga ah, caawin ayay u leedahay canugaaga inay carqaladeeyaan aadista darjiinka, la ciyaarida saaxibada banaanka iwm. Tani waxay ka caawisaa iyaga inay dareemaan in caalamkooda badbaado yahay markale, iyo in nolosha caadiga ah ay socon karto.



New Zealand Government

Murugada carruurta ee lumiyay saaxib ama xubin qoyska balaaran

Sida naxdinta, sida carruurta uga falceliyaan murugada way ka duwantahay dadka waaweyn, oo waxaa saameeya da'dooda. Markii dhimashada ay naxdin noqoto, sida dadka weyn tani waxay ka dhigi kartaa nidaamkooda murugada mid aad u adkaato.

Aaminsanaanta carruurta ee ku saabsan dhimashada waxay isbadashaa iyaga oo korayo

Carruurta dugsiga barbaarinta hore waxay u arki karaan sida ku meel gaar – in qofka uu “jiifo” laakin soo kici doono. Carruurta dugsiga hoose waxay bilaabaan inay uga fakaraan sida dadka weyn, laakin inta badan waxay aaminsanyihiin inaysan ku dhaceyn ama qof walba ay garanayaan.

Carruurta ma lahan marwalba erayada looga hadlayo sida ay dareemayaan

Carruurta ma lahan marwalba erayada looga hadlayo sida ay dareemayaan, marka waxay u janjeeraan inay muujiyaan dabeecada afkaaraha dareemahooda – ka laabanayo, carqaladeynta, dhib badnaanaya, xanaaqa, diidayo in dugsiga aadaan iyo sidaas. Carruurta waxay u janjeeraan inay ka murugoodaan “qarxiska”, marka waxay iska badeli kartaa sida u muuqato si gabi ahaanba ku laabashada caadiga, dhibaateysan, ku celcelis ah.

Marka waa muhiim in la lahaado wax ka badan dulqaadka caadiga ah

Waa muhiim in la ahaado wax ka badan dulqaadka caadiga ah, iyo in la fiiriyo sida ay dareemayaan oo isku day inaad kala hadashid wax ku saabsan midaan. Sida naxdinta, iyada oo naxdinta dabiici ah in la isku dayo ka illaalinta carruurtaada xanuunka iyo murugada, tani ma ahan caawin. Carruurta waxay eegaan dadka weyn si ay u bartaan sida loo dhaqmo, marka weydiinta sida ay dareemayaan, weydiinta su'aalaha ay qabaan, iyo ugu sharaxida waxyaabaha erayada ku haboon da'dooda, waa muhiim.

Wadaagidda qaar ka mid ah murugadaada gaarka ah, iyada oo sidoo kale aad tusineysid inaad ka soo kabsan kartid oo nolosha u socon karto, waa caawin. Ugu sharaxida dhimashada erayo ahaan waxay fahmayaan sidoo kale waa caawin. Ka fogow isticmaalida erayada jahwareerin karo iyaga, sida “aaday hurdo weligeed”, ama “dhintay”.

Sidoo kale caadi ayay u tahay in carruurta la kulmaan murugo inay aad u qalafsanyihiin ama walwalsan, oo cabsi badan

Sidoo kale caadi ayay u tahay in carruurta la kulmaan murugo inay aad u qalafsanyihiin ama walwalsan, oo cabsi badan ee in tirooyinka kale muhiimka ah ee noloshooda ay dhiman karto. Sidoo kale waa, sida naxdinta, caadi u yihiin inay hormariyaan astaamaha jirka – calool xanuun, madax xanuun – iyo sidoo kale yeeshaan isbadelada jadwalada jiif caadi ah. Kalsooni gelinta iyo raaxo gelinta muhiim ayay u tahay iyaga inay badbaado dareemaan iyo jecely.

Tallooyinka dhaqanka way caawinayaan

Tallooyinka dhaqanka ee kore waxay caawin u tahay taageerida canugaaga oo dhinaca cabashada kadib dhimashada naxdinta. Jooqteynta jawadalada caadiga ah, iyo hubinta in lagu dhiirogeliyo ciyaarta, oo lagu muujiyo nafsadooda illaa sawirida, dhammaantood waa xeelado cusub.

Sidoo kale waa caawin in la hubiyaa in macalimiintooda iyo dugsiga ogyihiin waxa ku dhacay canugaaga, iyo la ogolaanshaha macalinka sida ay u taageeri karaan canugaaga, sida warbixintaan waxaa lala wareegaa isku fasalkooda, iyo waxa la sameeyo haddii canugaaga ku dhibaatooda dugsiga.

Sida qof weyn, murugada carruurta waxay dhaaftaa dhour bilood, jaceylkaaga, iswaafaqsan, iyo daryeelka canuggaaga, oo ay la jiraan joogteynta lagu dhiirogelinayo iyaga inay hadlaan, iyo warbixin wadaagida oo erayo ahaan way fahamsanyihiin, waa waxa u ah bogsiiin iyaga.

Wixii taageerada murugada, walaacsanaanta, dhibaataada ama fauya qabka maskaxda, waxaad soo wici kartaa ama fariin qoraal u soo diri kartaa 1737 – bilaash ah, waqti walba, 24 saac maalintii, 7 maalmood isbuucii - si aad kala hadashid la taliye tababaran.



New Zealand Government